# Wax-ka-beddel lagu sameeyay tallaabooyinka ka hortagga cudurka ee khuseeya safarrada Svalbard iyo doomaha dalxiiska ee maraya xeebta dalka

– Dawladdu waxa ay hadda debcinaysa dhowr ka mid ah tallaabooyinka ka hortagga cudurka ee khuseeya safarrada Svalbard iyo doomaha dalxiiska ee mara xeebta. Waxa ka mid ah in wixii hadda ka dambeeya dadka difaacan ee soo bandhiga shahaadada koroonaha laga dhaafayo shuruudka ah in ay soo bandhigaan tijaabada SARS-CoV-2 oo cudurka laga waayey oo la qaaday ka hor intaan la aadin Svalbard, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Waxa la oggolaanayaa doomaha dalxiiska ee mara xeebaha Norway iyo Svalbard haddii la buuxiyo shuruudo gaar ah, waxaana dib loo fasaxayaa in diyaaradaha *charter*-ka ee ka soo duullay berrigu ay ku degaan Svalbard. Dhammaan wax-ka-beddelladani waxa ay dhaqangal noqonayaan Axad 20-ka Juun saacadda 12.00.

– Waa muhiim in Svalbard laga qaybgeliyo dib-u-furidda bulshada ee hadda socota. Muddadii cudurka safmarka ah socday waxa laga marmaan noqotay in si gaar ah loo ilaaliyo Svalbard, iyadoo ay sababaha ka mid tahay in adeegyada caafimaadku nugul yihiin. Hadda isbeddel wacan ayaa socda taas darteedna waxa ii farxad ah in hadda loo samayn karo debcinno kale, ayay tidhi Monica Mæland (H) oo ah wasiirka caddaaladda iyo heeganka.

Haddii dadka u safrayaa ay kordhaan waxa dhici karta in cudurku ka dillaaco kaddibna culays ku yimaado adeegyada caafimaadka ee degmada iyo awoodda badbaadinta ee Sysselmann-ka. Halka ay Svalbard juqraafi ahaan ku taallo ayaa keenaysa in wakhti badan la sii soconayo haddii loo baahdo gargaar caafimaad oo xooggan, taas oo keenaysa in haddii cudurku ka dillaaco Svalbard loona baahdo in bukaanka la keeno berriga, uu cawaaqib xun iman doono.

Taas darteed waa in la sii wado qaar ka mid ah tallaabooyinka ka hortagga cudurka ee khuseeya dadka tegaya Svalbard, si inta ugu badan looga taxaddaro in cudurku ka dillaaco. Arrimahaasi waxay keenayaan in dib-u-furidda Svalbard ay noqonayso mid ka gaabinaysa oo loo hubsanayo si ka badan dib-u-furidda berriga.

**Ganacsiga dalxiiska ee Svalbard**
Waxa la joojinayaa shuruudkii ahaa in safarrada berriga loo sameeyo hage u gaar ah, oo waxa lagu beddellayaa waajibaad la saarayo shirkadaha ka ganacsada dalxiiska oo ku saabsan in ay hawlaha u fuliyaan qaab ka hortagaya faafidda cudurka oo waafaqsan hageyaasha heerka qaran ah iyo nidaamyada loo dejiyay ganacsigooda ee ka jira berriga.
Goobaha jiifka ee Svalbard boqolkiiba 90 inta ay qaadaan ayay ka faa'idsan karaan, islamarkaana waxa la joojinayaa shuruudka maanta jira ee ah in dalxiiska berriga loo sameeyo qorshe u gaar ah loona soo bandhigo Sysselmann-ka iyo meelo kaleba.  Boqolkiiba 10-ka ka soo hadhay inta meeshu qaaddo waxa loogu talogalay martida lagu waajibiyay karantiil ama gooni-u-bixid. Hoteellada iyo goobaha jiifka waxa laga rabaa in ay sameeyeen qorshe ku saabsan la socoshada martida jiifka ee ku jirta karantiil ama gooni-u-bixid.

Dawladdu wixii hadda ka dambeeya dadka ma kula talinayso in ay iska dhaafaan safarrada gudaha waddanka, oo markaa waxa la fasaxayaa socdaalka *charter*-ka ee lagu tegayo berriga. Waxa sii jirayaa madnuucista socdaalka *charter*-ka ah ee caalamiga ah.

**Doomaha dalxiiska ee maraya xeebaha Norway iyo Svalbard**
Sida hore loo sheegay waxa shahaadada koroonaha loo isitcmaali karaa doomaha dalxiiska ee xeebaha maraya marka la galo heerka 3-aad ee qorshaha dib-u-furidda bulshada ee dawladda. Haddii dad aan difaacnayn soo galaan markab ay dad badan saaran yihiin waxa ka dhex dillaaci kara cudurka. Khibradda aan ka baranay sannadkii hore ayaa ina faraysa in la taxaddaro waayo waxa adkaan kara in la maareeyo cudurka doomaha ka dhex dillaaca. Taas darteed waxa doomaha dalxiiska loo oggolaanayaa in ay kordhiyaan tirada dadka raaci kara doonta, marka dadka doonta saaran ay caddayn karaan in ay difaacn yihiin iyagoo isticmaalaya shahaadada koroonaha.

Ka hor intaan la bilaabin waa in Sysselmann-ka loo keeno bayaan ku saabsan in la buuxiyay shuruudadaha xeer-hoosaadka. Waxa la bilaabaya in la xadiddo tirada dadka saarnaan kara doomaha dalxiiska ee maraysa xeebaha Norway iyo Svalbard haddii rakaabka iyo shaqaaluhu aanay difaacnayn, waxaana tirada laga dhigay 200 qof  iyadoo laga rabo in tijaabo la iska

qaaday ka hor intaan safarku bilaabmin. Safarrada doomaha dalxiiska ee Svalbard, ee ay la socdaan ugu badnaan 200 qof oo aan difaacnayn, waa in laga bilaabo laguna dhammeeyo Svalbard. Haddii rakaabka iyo shaqaaluhu difaacan yihiin waxa la oggol yahay 2000 qof. Waxa la isticmaali karaa boqolkiiba 90 inta doonto qaaddo. Waxa kale oo shuruud ah in doomaha dalxiiska xeebaha ee jooga Svalbard ay ku laabtaan berriga ama dekaddooda haddii laga shakiyo ama la xaqiijiyo in ay jiraan dad saaran doonta oo qaba SARS-CoV-2.

Madnuucista ka soo degista doontu waxa uu khuseeyaa keliya doomaha dalxiiska xeebaha ee ka soo baxay waddan karantiilku waajb ku yahay cidii ka timaada, ama haddii doonto dad ka soo qaadday waddamo karantiilku waajib noqonayo ama haddii rakaabka ama shaqaaluhu ku dageen meel karantiilku waajib noqonayo.
Haddii laga shakiyo in ay jiraan dad cudurka qaba marka la marayo dhammaadka safarka doomaha dalxiiska xeebaha, waa in dhammaan dadka doonta saarani ku jiraan doonta ilaa inta hay’adaha caafimaadka ee maxalliga ah go’aaminayaan wax kale.